



## **Wararkii u dambeeyey ee ciyaaraha: Kooxaha Ciyaarta Kubada Golayga Gabdhaha ee Iskuulada Benson iyo Grant ayaa ugu muhiimsan furitaanka Tartanka Ciyaaraha Iskuulada Portland ee Maalmaha Ciidaha(Holiday Classic)**

Tartanka Ciyaaraha Iskuulada Portland wuxuu soo bandhigi doonaa maalmaha fasaxyada ciidaha labada kooxood ee kubada koleyga gabdhaha ugu fiican tartanka wareeg cusub ee lagu ciyaari doona Dugsiga Sarre ee Franklin cusub jiimkiisa dhallaalaya. Dugsiyada Benson iyo Grant ooo tartankii la soo dhaafay wadaagay koobkii Tartankii Ciyaaraha Iskuulada(PIL) , iyaga oo noqday inay ka mid yihiin kooxaha ugu sarreeya gobolka kooxiisa,waxa kale oo noqonayaan kooxdii sideedaad ee ciyaartoyga ee ka ciyaari doona maalmaha fasaxyada ciidaha tartankaa(PIL) bisha Diisembar 21-23 Dugsiga Sarre ee Franklin

Maalinta furitaanka, waxaa lagu bilaabay tartanka Dugsiga Benson bishan Diisember 1deedii, iyada oo ay wada ciyaareen marquee, kaga guuleystay 61-44 iskuulka Jesuit, lana ciyaari doona South Medford saacadu marka ay tahay 5:15 galabnimo. South Medford waa kooxda ugu xoog badan Koonfurta Oregon iyada oo aan laga badin ciyaarihiikaa dhacayey Koonfur Galbeed ilaa intii la bilaabay tartanka ciyaaraha ee sanadkii 2014-15

Grant wuxuu la ciyaari doonaa Sheldon saacadu marka ay tahay 1:30 duhurnimo. Markii saddexaad ee isku xigta kooxda Generals ay tartanka wada qaadeen koobka, iyada oo tartanka tagay 47-1 ilaa iyo intii dib u habeynta lagu sameeyey tartanka wareega 2014-15. Kooxda Sheldon waxa ay ahaayeen kooxda ugu sareysa Eugene sanado fara badan ee ka tartameysay South Medford ee Koonfur Galbeed.

Sidoo kale garoonka ciyaaraha Tigard, waxaa ku ciyaaraya kooxda difaacayneysa markii labaad koobka ee Three Rivers League; Forest Grove, wareega Three Rivers League tartankii ciyaarihiikaa kama dambeysta ahaa gobolka ee Greater Valley Conference; Camas, kuwaas oo ugu xooga badnaa Waqooyiga-Galbeed Washington; iyo Kentridge ee Seattle oo ka tartama Washington.

Dhammaan kooxuhu waxa ay ciyaarin doonaa saddex ciyaarood saddex maalmood, ciyaarta kama dambeysta ah ee koobka waxa la ciyaari doonaa bishan Diisember 23keeda, marka ay saacadu tahay 7:00 habeenimo. Munaasaadani waxa ay noqon doontaan sidoo kale mid lagu soo bandhigo jiimka Franklin, kaasi oo lala furey dhismaha dib cusbooneysiinta lagu sameeyey sanadkani oo madaxda Tartanka Wareega Ciyaaraha Portland(PIL) ay ku faanaan inuu yahay midka ugu wanaagsan gobolka oo dhan.

Waxa ku jira munaasabadani sideed kooxood ee ardayda fasalada 10naad iyo kooxaha fasalada 9aad oo tartankooda wareegyadaasi kala duwanaayeen. Qorshuhu wuxuu yahay sidii loo ballaarin lahaa 24 kooxood oo ka kooban dhammaan 48 kooxood sanad-dugsiyeedka 2018-2019.

*-Mike Tokito*